Deganaansho Bani'aadaminimo

Waxaa suurto gal ah in lagu siiyo deganaansho ku-meel-gaar ah haddii uu jiro xanuun adag, ayna adagtahay inaad dalkagi ka heshid dawada aad u baahantahay. Tusaale ahaan, haddii aad qabtid cudurka kelyaha, cudurada wadnaha iyo cudurka waalida (kuma jiraan waxa loo yaqaan buufiska iyo wareerka uu keeno shooggu) waxaad heli kartaa deganaansho bani'aadaminimo. Hase yeeshee, si aad u heshid deganaanshaha bani'aadaminimo waa inaad u dirtaa warqadda dhaqtarka wasaaradda qaxootiga iyo soo-galootiga.

Midayta qoyska

Sida uu dhigayo sharciga u yaala wadamada reer yurub, haddii ay xaasku tahay Dheenish ama haysato dhalasho kale oo reer yurub waxa aad codsan kartaa in aad la noolaado xaaskaaga adiga oo jooga Denmark. Haddii aad isku doonan tihiin qof Denmark degan aadna doonaysaan inaad is guursataan, waxaad codsan kartaa in arintaas lagugu tixgeliyo adigoo markaad is guursataan ka dib codsanaya la noolaanshaha xaaskaaga. Waxaa sidoo kale suurta-gal ah inaad la noolaatid haddii aad is-qabtaan ama is-guursataan qof haysta deganaansho qaxootinimo.

Kuma dacwoon kartid, kuumana dacwoon karaan haddii ay Denmark deganyihiin waalidkaa, walaalahaa ama caruurtaada oo qaan gaar ah.

Deganaansho Shaqo

Waxaad helaysaa deganaansho shaqo, haddii aad haysatid shaqo mushaharkeedu yahay 375.000. - Kr sannadkii aadna haysatid heshiis ama kunturaad shaqo. Waxa iyana la mid ah haddii aad haysatid shaqo ka mid ah waxa loo yaqaan " Positive List" oo ah cilmiyada looga baahanyahay Denmark. Qaabkii aad u dalban lahayd deganaansho shaqo adiga oo jooga Denmark waxaad ka daalacan kartaa bogga wasaarada is-dhex-galku ku leedahay internetka: www.nyidanmark.dk

---

XARUMAHA AAD KA HELI KARTID TALO BIXIN IYO ADEEG BILAASH AH:
F.G : (Fadlan horay u soo qaado dhamman waraaqahaga iyo turjumaan haddii aadan ku hadlin luqadda daanishka ama englishka).

KØBENHAVN:
- **Dansk Flygtningehjælp**, Borgergade 10, København. Arbacada inta u dhaxaysa 13:00 - 15:00 galabnimo. Ama Telefonka 33735000 maalin walba 9:00 subaxnimo ilaa 15:00 galabnimo ama noogu soo dir fariimaha luqadda english-ka email-kan advice@drc.dk
- **Refugees Welcome,** Dronningensgade 14, København. Arbacada inta u dhaxaysa 15:00 galabnimo ilaa 19:00 fiidnimo. Telefonka 50558011, ama ku soo dir waraaqaha luqadda danishka, englishka ama carabiga email-kan kontakt@refugeeswelcome.dk
- **Trampolinhuset**, Skyttegade 3, København. Arbacada inta u dhaxaysa 17:00 galabnimo ilaa 19:00 fiidnimo (kulan weji-ka-weji ah keliya)

ÅRHUS:
- **Indvandrerrådgivningen**, Vesterbrogade 14 - Butikken, Aarhus C. Telefon 88709898 - 26223611

DIIDMADA CODSIGAGA QAXOOTINIMO - MAXAA XAL AH

Qoraalkani wuxuu khuseeyaa qofka
ka helay diidmo maxkamadda qaxootiga
Dheenishka ama laanta soo-galootiga
ee loo yaqaan Udlændingeservice.

Qoraalkan waxaa diyaariyey anaga oo ah qareennada iyo ururrada madaxa-banaan ee u dooda qaxootiga. Mar walbana kuma raacsanin dowladda go'aamada ay ka qaadato qaxootiga, sababtoo ah waxaanu og-soon-nahay xaalada adag ee ay ku suganyihiin dad badan oo la diiday kiiskoodii qaxootinimo. Sidaas darteed ayaanu halkan kuugu sheegaynaa natiijada dhabta ah ay keentay amaba ay keeni karto diidmada lagu siiyey.

REFUGEES WELCOME
– bring your families

SOMALI VERSION

Qoraalkan waxaa sidoo kale lagu turjumay luqahada: Daanish, Ingiriisi, Carabi, Faransis, Ruush, Kurdi, Turki, Farisi/Dari, Isbaanish iyo Boosniyan/Serbiyan.

All versions can be found and downloaded here:
www.refugeeswelcome.dk

Diidmada Maxkamadda Qaxootiga

Diidmada ay bixiso maxkamaddu waxaa loo sababeeyaa sidan:

A) iyagoo rumaysan waayey dacwadada, ama

B) dacwdada oo aan ahayn ama loo arki waayey mid khatar ah oo qaxootinimo lagugu siin karo.

Haddaba si aad u heshid qaxootimadada waa inaad codsi u qorataa maxkamadda qaxootiga si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan codsigaaga - arintaas waxaa kaa caawin kara qareenkaaga ama ururadda u dooda qaxootiga. Si kastaba ha ahaatee, aad ayey ugu adkaataa inta badan dadka codsiyadda soo gudbista in laga aqbalo, sababtoo ah waxaa laga dalbadaa in ay keenaan caddaymo cusub oo la taaban karo.

Haddiiba ay dhacdo in dib-u-eegis lagu sameeyo dacwadada mar labaad, waxaa codsigaga eegaya isla qaadigii markii hore ku siiyey diidmada. Sidoo kale dib-u-eegistu waxay qaadataa waayadan dambe waqti dheer oo gaari kara ilaa 2 sano. Tusaale ahaan sanadkii 2010 waxaa maxkamadda soo gaaray ilaa 206 codsi oo dalbanaya in dib-u-eegis lagu sameeyo codsiyadooda, waxaana la diiday 97 codsi, halka dib-u-eegis lagu sameeyey 6 codsi oo keliya.

Haddaba inta aad ka khabaar sugeysid codsigaaga dambe, wax hakad ah ma gelin karto go'aankii ahaa in dib laguugu celiyo dalkaagii hooyo maadaama aad markii horeba diidmo ka heshay maxkamadda qaxootiga ama hay'adda qaabilsan soo-galootiga ee loo yaqaan Udlændingeservice. Sidaas darteed, ayaa boolisku wuxuu ka codsan doonaa maxkamadda qaxootiga in ay codsigaga go'aan uga gaaraan sida ugu dhaqsaha badan si dib laguugu celiyo dalkagi hooyo. Haddii aad dhuumatid ama lagu waayo codsigagu waxuu gelayaa hakad ilaa inta aad dib ugu soo laabanaysid xerada qaxootiga ee aad degayd, waxayna kuu soo jiidi kartaa xarig.

Diidmo ku timid dacwadaada oo aan lagu qancin awgeed:

Waa diidmada ay siiso Udlændingeservice qofka ay dacwaddiisa ku qanci wayso ama laga shakiyo in uu soo been-abuuray iyadoo isku eegaysa xaalada dhabta ah ee ka jirta dalkaaga iyo dacwada aad soo gudbisatay oo ah mid aadan qaxootinimo kaga heli karin Denmark, go'aanka noocaas oo kale ah ee ay udlændingeservice gaarto loogama dacwoon karo maxkamadda sare ee Denmark.

Dansk Flygtningehjælp, oo ah urur madaxbanaan ayaa waxay go'aansadeen in ay ku waraystaan si ay dacwadada u eegaan, taas macnaheedu ma ahan in ay u arkaan in dacwadadu guulaysan karto lakin waxay isku deyayaan in ay ku caawiyan inta tabartooda ah.

Maxaa iman kara marka?

Waxa aad noqonaysaa Fase 3 isla markaasna waxa lagu dejinayaa xerada dib-u-celinta. Inta aad ku sugan tahay xerada waxaad helaysaa lacag masruuf ama bedelkeeda oo ah inaad wax ka cuntid makhaayadda xerada. Booliskuna wuxuu u howl gelayaa sidii ay dib kuugu celin lahaayeen dalkaagii hooyo, waxayna kula yeelan doonaan wada-hadal ay kaaga dalbanayaan saxiixaaga si aad ugu fududayso in ay kugu celiyaan dalkaagii. Haddii aad haysatid passaport shaqaynaya boolisku waxay awood u leeyihiin in ay dib kuugu celiyaan dalkaagi. Haddii aadan haysan passport booliska ayaa kuu soo saaraya warqad saamaxaysa inaad ku laabato dalkaagi hooyo - waxayna qaadan kartaa bilooyin wadamada qaarkoodna waxay qaadan kartaa sanado in laguu helo warqad dib laguugu celiyo. Haddii aad shaki gelisid dalka aad u dhalatay boolisku waxay isku dayayaan in ay la xiriirayaan wadamo badan, waxaadna isku keeni kartaa in lagu xiro ilaa inta arintaas lagaa soo baarayo.

Haddii aad saxiixdo in aad iskaa laabto?

Waxay arintaasi leedahay waxoogaa faa'iidooyin ah, waana muhiim in aad qiimaysid.Tusaale ahaan waxaad fursad u heli doontaa inad ku laabato dalkaagii adigoo aan boolisku kula socon, sidaas darteed mas'uuliyiinta dalkaagu kuuma yeelan doonaan fiiro gaar ah. Sidoo kale adiga ayaa booliska u sheegaya xilliga aad safarka diyaarka u tahay, taas macnaheedu waxa weeye in aysan boolisku si kedis ah gurigaaga kuugu iman karin adiga oo aan ogayn.

Fursad Kale Ma Jirtaa?

Qofka diidmada haysta fursadihiisu ma badna, tusaale ahaan iskama dhiibi karo wadamada kale ee ku jira heshiiska loo yaqaan Dublin. Heshiiskaasi waxaa ku jira dhammaan dowladaha midowga yurub iyo weliba dalalka Norway, Iceland iyo Switzerland. Sida uu heshiisku yahay dalalkaasi waxay dib kuugu soo celin doonaan Denmark. Haddaba si aad dacwad cusub uga furatid mid ka mid ah dalalkaas waa inaad haysataa caddayn dhab ah oo sheegaysa in aad saddexdii bilood ee u dambeeyey aad ku soo noolayd dal ka baxsan dowlahadaha ku jira heshiiska Dublin. Sida uu dhigayo sharciga Denmark haddii aad doonaysid in aad la noolaatid reerkaaga oo halka degan ama aad ka shaqaysato Denmark waa inaad ka soo codsataa adiga oo jooga dalkaagi hooyo. (sii akhri bogga dambe).

Nolasha ay ku noolyihiin dadka dacwadooda la diiday ee ku jira xeryaha ama kuwa magaalada iska gala waa mid aad u liidata intooda badanna waxaa ku dhaca cudurada maskaxda, waxana mar walba sugaysa dib-u-celin. Haddaba waxaan kugula talinaynaa inaad si dhaqsaha ah u raadsatid dal saddexaad oo ku aqbala. Tusaale ahaan, haddii ay jirto dal uu deganyahay qof qoyskaga dhow ka mid ah, isku day inaad la xiirto qofkas. Waxa kale oo muhiim ah inaad la xiriirto asxaabtaada iyo ururada dadka caawiya ee jooga dalkaagi hooyo si ay kuu caawiyaan marka lagu celiyo.

→